

CUTUBKA 9aad

- 117:Dhabbo=Waa meel lamaro.
118:Dhabogaal=Dhabada geelu samaysto inta badan kolkuu aroorka yahay ama carraabada yahay.
119:Dhadhaab=Dhagax weyn oo konkooobsan oo buur ka soo dhacay oo meel kaligii fadhiya.
120:Dhagaxbolol=Dhagaxciid.
121:DhagaxdidibDhagaxa jilicsan ee xilliyada roobka biyaha nuuga ee laga helo dhulka dibidka ah.
122:Dhagaxdixeed=Dhagaxa gamuuran.
123:Dhagaxlisin=Dhagax madow oo mindiyaha.
124:Dhagaxmadow=Dhagax madow oo inta badan lagahelo meelaha maamaca ah iyo meelaha maamac xigeenka ah.
125:Dhagaxmamac=Dhagax adag ee laga helo dhulka maamaca ah.

CUTUBKA 10aad

- 126:amlaak=Waa erey carabi ah la Macno ah Hanti,maal,xoolo.
127:abbaan=abbaan ku mar waa shaqaale cid ushaqeeya mar kalane waa madax ama hogaamiye.
128:ardaal/ardal=waa erey carabi ah oo la macna doqon.
129:baaniyaal=waa erey hindi ah oo la macno ah qof hindiga ah.
130:afmeer=Waa erey la macno ah goodiga dhulka la deggan yahay
131:gaaroodi=Waa dhulka ay aad uga baxaan dhirta galoolka ahiyo dhirta qudhaca ah.
132:ahmin=wananka iyo orgida ladhoofinayo.
133:aremaad=Waa erey af hindi ah oo cay ah.
134:arjood= Waa erey af hindi ah oo cay ah.
135:idalji=Waa magac nin ganacsade ahaa oo berbera joogi jirey.
136:allah ka koodin=Allah oo lagu gaaloobo ama lagu kufriyo.
137:aswaaq=Waa erey carabi ah oo la macno ah suuq ama suuqyo
138:Raamraam=Waa illah sanam ah oo ay hindidu berbera ku caabudi jireen.
139:abdaal=Waa erey carabi ah oo la macno ah bedel ama bedelaad.
140:iqbaal= Waa erey carabi ah oo la macno ah ogolaansho ama ia fahan.
141:nasar= Waa erey carabi ah oo la macno ah guul.
142:waqaf=Waa erey carabi ah oo la macno ah bilaash.
143:ablacaayeene=Waa erey carabi ah oo la macno ah liqayeene.
144:abuya=Waa jaad dhar ah oo la xiranjiray xilligas.
145:kudkude=Waa dulin yar oo ciida ka soo dhex baxa oo qaniinyadiisu arami iyo eel reebto
146:awbaashta= Waa erey carabi ah oo la macno ah wax huubo ah ama dad guraangur ah
147:Iclaan= Waa erey carabi ah oo la macno ah ogeysiis
148:Kinaayo= Waa erey carabi ah oo la macno ah maldahan
149:Arnab=Waa erey carabi ah oo la macno ah bakayle.
150:Arwaax=Waa erey carabi ah oo la macno ah nolol.
151:Ajsaad= Waa erey carabi ah oo la macno ah jidhka.
152:khaliya= Waa erey carabi ah oo la macno ah meel maran.
153:Idhan=meesha wax ku dhamaadaan.
154:Acmaa=Waa erey carabi ah oo la macno ah indho la'an.
155:Ramaad= Waa erey carabi ah oo la macno ah dambas
156:Dadqaad=bahalka dadka qaata ee cuna sida libaaxa.
157:Hoodo=Cawo iyo ayaa ama nasiib wacan.
158:Ayaan=Erey kale oo la macno ah hoodo.
159:Samatabixin=badbaadin.